



XAFIISKA QARAMADDA MIDDQBAY U QAALIBLSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Faafin Degdeg ah

WAR-SAXAAFADEED 45/2014

Ergayga Gaarka ah ee Qaramadda Middobay u Qaabilsan Soomaaliya oo soo dhoweeyay qabashada Magaaladda Baraawe

Muqdisho, 6 Oktober 2014 – Ergayga Gaaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramadda Midoobay u qaabilsan Soomaaliya (SRSG) Nikolas Kay ayaa soo dhoweeyay qabashada maanta la qabtay magaaladda dekada leh ee Baraawe, lagana qabtay Al-shabab. Waxaana magaaladda qabtay Ciidamadda Soomaaliyeed iyo kuwa Midowga Afrika (AMISOM) oo is bahaysanaya.

“Qabashada ciidamadda Soomaaliyeed iyo kuwa AMISOM ay qabteen magaaladda Baraawe waxay guul lataaban karo oo muhiim ah u tahay wadadda ay ummadda Soomaaliyeed ku doonayso in ay ku gaarto nabadd iyo xasilooni. Waxaan soo dhowaynayaa guushan muhiimka ah. Waxaan ku guubaabinayaa dadka ku haray Al-Shabab in ay iska dhigaan qoryaha. Waxaa hada la joogaa wakhtigii dhammaan dadka Soomaaliyeed ay soo dhowayn lahaayeen nabadda iyo geedi socodka siyaasadeedba,” ayuu yiri SRSG Kay.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Aleem Siddique

Tel: +254 41 350 6603 • Email: unsom-spokesperson@un.org

Fadlan eeg rugta Internet-ka:

www.unsom.unmissions.org • [@UNSOM](https://www.facebook.com/UNSOM) • [facebook.com/UNSOM](https://www.facebook.com/UNSOM)